***HORUMARINTA DUGSIYO AMMAAN IYO TAAGEERO LEH***

***KHULAASADA***

***Dugsiyada Dadweynaha Buffalo***

# *HEERARKA LOOGU TALOGALAY LADHAQANKA BULSHADA-BALAARKEEDA IYO TAAGEERADA SOO DHEXGALKA 2014 -02015*

## *LOOGU TALOGALAY ARDEYDA IYO WAALIDIINTA*


***Donald A. Ogilvie***
***Kormeeraha Kumeelgaarka ah ee Dugsiyada***

***Dr. Will Keresztes***
***Madaxa Taageerada Ardayga***


***www.buffaloschools.org***

***HORUMARINTA DUGSIYO AMMAAN IYO TAAGEERO LEH***

Baaristu waxay tusinaysaa in xiriirada wanaagsan ay kucaawiyaan caruurta waxbarashada iyo in ardayda ay aad ugu baddantahay in ay kuguulaystaan ayna aad u yartahay in ay dibada aadaan marka ay dareemayaan in ay kuxiriiraan dadka kale ee kusugan dugsigooda iyo bulshada. Dugsiyada Dadweynaha Buffalo waxay u go'een horumarinta xiriiro wanaagsan oo lala yeesho ardayda iyo si kor loogu qaado bey'ad dugsi iyo dhaqan siinaya ardayda goob taageero leh meeshaas oo ay ugu koraan dhammaan qaab waxbarasho iyo qaab bulshadeedba.

Dugsiyada Dadweynaha Buffalo wuxuu aad ugu faraxsanyahay in uu kudhawaaqo Xeer cusub oo Dhaqan ah (Xeerarka loogu talogalay Dhaqanka Bulshada-Balaarkeeda iyo Taageerada Soo dhexgalka *2013-2014)uu qabatamay Guddiga Waxbarashada* Buffalo markii ay taariikhdu ahayd bishii Abriil 24, 2013 iyo in uu dhaqan galay bisha Luulyo 1, 2013. *Xeerarkaan waxaa loo horumariyey si loo hubsado in dugsiyadeenu ay ammaan yihiin iyo goob nidaamsan meeshaas oo waxbarida iyo waxbarashada ay kadhacaan iyo si loogu caawiyo ardayda in ay kuguuleystaan nolosha iyo bulshada.*

Ayada oo lagu ilaalinayo shuruudaha Mashruuca mid AMMAAN AH (Dugsiyada Ammaanka ah ee Lidka ku ah Falka Rabshada), Degmadu waxay kusiisey luuqad cad ee waadax ah ardayga iyo waalidka/waliga khulaasada kusaabsan Xeerarka Dugsiyada Dadweynaha Buffalo ee loogu talogalay Ladhaqanka Bulshada-balaarkeeda iyo taageerooyinka Soo dhexgalka *2013-2014*. Nuqul kusaabsan nuskhada buuxda ee Xeerarka ayaa laga helli karaa bogga intarnatka Degmada. Oraah gaar ah oo loogu talogalay nuskhada buuxda ee dhameystiran ayaa lagu xukumi doonaa dhammaan xaaladaha.

**Xusuusnoow:** Qayb kasta ee kujirta bogaga dukumeentigaan bogaga nuskhada buuxda ama dhameystiran ee *Xeerarka* halkaas oo faahfaahin dheeri ah ee loogu talogalay qaybtaas ayaa laga helli karaa.

***WAALIDIINTA AH SIDA LAMMAANAYAAL*** (bogga 1)
Ardayda, waalidiinta/weliyaasha iyo shaqaalaha dugsiga dhammaan waxay qabbaan qaanuun kusaabsan kadhigida dugsiga ammaan waxaana khasab ah in ay wadashaqeeyaan si ujeeddadaan loo gaaro. Waalidiinta waxaa lagu guubaabiyey in ay kalahadlaan dhaqanka ilmahooda wakiilayaasha dugsiga iyo in ay ula shaqeeyaan dugsiga taageerada xeeladaha kucaawin doona ilmahooda in uu guul kugaaro dugsiga iyo bulshada.

***KOR U QAADIDA DHAQAN ARDAY WANAAGSAN*** (bogga 2)
Dugsiyada waxay bixin doonaan taageerooyin dhaqan wanaagsan sidoo kale fursadooyin macno leh si loogu caawiyo ardayda in ay horumariyaan xirfado kusaabsan aqoonsashada iyo maareynta dareemaha, horumarin khuseysa dadka kale, aasaasida xiriiro wanaagsan, sameynta go'aano masuul ah, kusaabsan dadaal looga hortagayo dhaqamada xun-xun.

***KAHORTAGIDA IYO SOO DHEXGALKA*** (bogga 2)
Xeeladaha kahortaga waxaa lasiinayaa dhammaan ardayda sidoo kale ardayda waxay helli karaan soo dhexgalo iyo taageerooyin haddii loo baahdo caawimaad dheeri ah.

***SAMEYNTA KAHORTAGA / XEELADAHA SOO DHEXGALKA*** (boggaga 7-13)

***NIDAAMYADA DHAQANKA WANAAGSAN***
Seddex nidaam oo isku xiga oo loogu talogalay in lagula dhaqmo baahooyinka dhaqanka dhammaan ardayda.

**Heerka 1 SOO DHEXGALO GUUD:** Soo dhexgalada guud waxay diirada saarayaan horumarinta dhaqamo bulsho oo wanaagsan ee loogu talogalay dhammaan ardayda. Waxaa kamid ah barida dhaqanka filashooyinka iyo aqoonsashada ardayda filashooyinka xiga.

**Heerka 2 SOO DHEXGALADA KAALINTA LABAAD:** Soo dhexgalada kaalinta labaad waxaa loogu talogalay in lagu caawiyo ardayda u baahan taageero dhaqan dheeri ah oo kabaxsan xeeladaha guud. Soo dhexgalada kaalinta labaad waxaa kamid noqon kara:

Gudaha-soo gelid Banaan-bixid (CICO): ardaydu waxay lasoo galaan gudaha qof weyn biloowga maalin kasta oo-dugsi si ay u hellaan xiriir wanaagsan maalin kasta.

Kooxaha Waxbarida Waxbarasho/Bulshada (SAIG): ardayda waxaa loo taageeraa kooxo yar ayada oo ay lasocoto tilmaamid toos ah oo ah filashooyinka dugsiga- balaarkiisa iyo/ama dhaqamada bedelaada ah.

Kooban FBA/BIP: qorshaha dhaqanka waxaa loo horumariyey ardayga kelida ah ayada oo kusaleysantahay awoodaha ardayga iyo baahooyinka dhaqameed.

**Heerka 3 SOO DHEXGALADA SEDDEXAAD:** Soo dhexgalada sedexaad waxaa loogu talogalay ardayda kuwaas oo

Kafaa'ideysan doona taageerada kelida ah. Soo dhexgalada seddexaad waxaa kamid noqon kara:

FBA/BIP Adag: Qorshaha soo dhexgalka dhaqanka waxaa sameeyay koox ka kooban dad (isugu jira qoys, bulsho iyo dad waaweyn ee jooga dugsiga ilmaha) midkaas oo kudhisan awoodaha ilmaha iyo baahooyinka dhaqanka.

Iskuxiran (Xirid): kooxo kuwaacinaya guusha dhallaanka ayaa laga soo doortey ardayga dhinaciisa iyo qoyskiisa/qoyskeeda. Kooxdaan waxay u kulmayaan si ay u horumariyaan soo dhexgal iyo qorshe taageero lagu sameynayo dhaqanka baahooyinka ardayga.

***SHARAFTA LOOGU TALOGALAY DHAMMAAN XEERKA ARDAYDA*** (bogga 24)
Sharafta loogu talogalay Dhammaan Xeerka Ardayda (Xeerka Sharafta) wuxuu hubsanayaa in ardayna uu lakulmin midab takoor ama dhibaateyn, kudhisan jinsiga qofka dhabta ah ama midabka la arko, culeyska, asalka dhallashada, kooxda qowmiyada, diinta, naafada sameynta diinta, jiheyn galmo, nooca/aqoonsiga ama galmo shaqaalaha dugsiga, baska dugsiga, meesha hawsha dugsiga ama laga bilaabey dhulka dugsiga kana sii socotey meesha dugsiga.

Dhibaateynta waxaa kamid noqon kara, ayada oo ay jiraan waxyaabo kale, isticmaalka, kusaabsan dhammaan alaabta dugsiga ee macluumaada tiknoolojiyada, ay kujirto, laakiin aan ku ekayn iimayl, fariimo degdeg ah, boggaga intarnatka khaaska ah, qolalka lagu sheekaysto, boggaga, teleefoonka gacanta, nidaamyada ciyaarta iyo boggaga warbaahinta bulshada, dhibaateynta ula kac ah ama hanjabaad loo gaysto dadka kale.Dhibaateynta noocaan ah waa mid guud ahaan loo yaqaano sida "foorjo-la isku gudbiyo."

Degmada waxay u go'day in ay ilaaliso xuquuqaha lasiiyey dhammaan ardayda hoos yimaada qaanuunka dowlada iyo degmada.Intaas waxaa dheer, si kor loogu qaado degaan dugsi rayid ammaan, caafimaad, iyo nidaamsan, dhammaan ardayda waxay xaq u leeyihiin in ay

4) Fishaan degaan dugsi midkaas oo ladhaqmaya waxbarashada

3) Loola dhaqmo si ixtiraam leh kuwa jooga bulshada dugsiga

5) Kaqayb qaataan dhammaan hawlaha Degmada kusaabsan asal sinaan ah ayada oo aan la eegayn jinsiga, midabka, caqiidada, asalka dhallashada, diinta, nooca, jiheyn galmo ama naafonimo (waafaqsan Siyaasada Dhibaateynta Lidka-ku ah Degmada)

2) Lasiiyo qaanuuno dugsi, iyo marka ay daruuri tahay, ay hellaan sharaxaad kusaabsan qaanuunadaas ka ahaada shaqaalaha dugsiga

1) Muujiyaan nukhsadooda kusaabsan dhacdooyinka laxiriira shaqaalaha dugsiga loo ogolaaday lagu rogo ciqaab edeb ah, oo laxiriirta kusoo rogida ciqaabta

***XEERARKA LOOGU TALOGALAY LEBISKA XEERKA LABISKA*** (bogga 30)
Dhammaan dadka waxaa laga filayaa in ay bixiyaan ihtimaam sax ah oo lasiiyo nadaafada shaqaalaha iyo in loo xirto si sax ah hawlaha dugsiga. Ardayda iyo waalidiintooda waxay qabbaan masuuliyad aasaasi ah ee loogu talogalay labis arday macquul ah iyo muuqaal. Macalimiinta iyo dhammaan shaqaalaha Degmada waxaa khasab ku ah in ay tusaaleeyaan dibna u fuliyaan labis dhar arday macquul ah kuna caawiyaan ardayda in ay horumariyaan fahan kusaabsan muuqaal sax ah oo kusaabsan nidaamka dugsiga,sidoo kale adeecida xeerarkaan.

Ardayda aan u hoggaansamin xeerka labiska waxaa looga baahnaan doonaa in ay xagaajiyaan muuqaalkooda ayaga oo daboola ama kasaara qalabka khilaafa, iyo haddii ay daruuri tahay iyo/ama sameynta, kubedelida qalab macquul ah. Arday kasta midkaas oo diida in uu sidaas sameeyo wuxuu u hoggaansami doonaa edbin waafaqsan *Xeerarkaan loogu talogalay Xeerarka Ladhaqanka Bulshada-balaarkeeda iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka.*



***DHAQAMADA DHIBKA BADDAN IYO AAN MUNAASABKA AHAYN: HEERARKA JAWAAB CELINTA*** (bogga 14) Marka ardayda ay yihiin kuwo dhib baddan ama u dhaqmaan si aan munaasab ahayn, shaqaalaha dugsiga iyo maamulayaasha waxay u jawaab celinayaan si macquul ah, munaasab ah oo iswaafqsan. *Xeerarka Dugsiga Dadweynaha Buffalo ee loogu talogalay Ladhaqanka Bulshada-balaaran iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka 2013-2014* waxay sharxaysaa afar heerar oo jawaab macquul ah oo loogu talogalay dhaqanka dhibaatada aan munaasabka ahayn. Dhaqan kasta oo aan munaasab ahayn ama dhibaato leh oo loogu talogalay mid ama kabadan oo xeerarkaan soo dhexgalka ah iyo jawaab. Maamulayaasha iyo shaqaalaha dugsiga waxaa khasab ku ah in ay isticmaalaan keliya heerarka loosoo jeediyay dhaqan kasta.

Haddii dhaqanka dhibaatada leh ama aan munaasabka ahayn uu yahay mid loogu talogalay labbo ama kabadan oo heerar ah, hadaba,, meel kasta
oo ay suurtogaltahay, heerka ugu hooseeya ee soo dhexgalka iyo jawaabta edbinta ayay khasabtahay in marka hore la isticmaalo.

***HEERARKA SOO DHEXGALKA IYO JAWAAB CELINADA*** (bogga 15)

***Heerka 1: Soo dhexgalada iyo Jawaab celinada Fasalka iyo SST***

- Waxaa loogu talogalay in si sax ah loo baro iyo dhaqanka bedelaada ah si ardayda u bartaan una muujiyaan dhaqan ixtiraam leh

Waxaa dhici karta in ay munaasabtahay marka ardayga aan haysan muddo kahoreysa dhacdooyinka iyo in soo dhexgalada aan ladhaqan gelin

***Heerka 2: Maamulida Soo dhexgalada iyo Jawaab celinada***

Waxay kulug lahaan kartaa maamulida dugsiga waxaana loogu talogalay in lagu saxo dhaqanka ayada oo la adkevnavo halisnimada dhaqanka halka ardayga lagu haynayo dugsiga

- Waxaa dhici karta in ay munaasabtahay marka taageerooyinka laga dhaqan geliyo fasalka si loo sheego dhaqanka laakiin dhaqanku wuxuu sii wadey in uu sixun u saameeyo waxbarashada ardayga iyo kuwa kale

## *Heerka 3: Cayrin iyo Wareejin Jawaab celino*

- Waxay kulug lahaan kartaa cayrin muddo-gaaban oo ardayga laga cayriyo dugsiga dhaqanka darnaanta xumaanshihiisa aawadeed

Waxay munaasab noqon kartaa marka soo dhexgalada iyo taageerooyinka ladhaqan geliyo laakiin dhaqanka uu sii xumaanayo (xadgudubyo soo noq-noqda)

***Heerka 4: Cayrin Lafidiyey iyo Wareejin Jawaab celino***

- Waxay kulug leedahay cayrinta ardayga laga cayriyo dugsiga darnaanta xumaanta dhaqanka darteeda

- Waxay kulug lahaan kartaa meelaynta ardayga lagu meeleeyo degaan ammaan ah meeshaas oo bixisa qaab dhismeed dheeri ah oo lagu sheego dhaqanka

- Waxaa diirada lasaarayaa ilaalinta ammaanka bulshada dugsiga iyo dhameynta dhaqamada nafsada-burburiya oona khatarta ah

- Waxaa dhici karta in ay munaasabtahay marka dhaqanka ardayga uu si halis ah u saameynayo ammaanka dadka kale ee dugsiga jooga

***HAWSHA LOOGU TALOGALAY ARDAYDA QABTA NAAFADA*** (boggaga 39-40 iyo Lifaaqa F)
Waxaa dhici karta in ay noqoto mid lagama maarmaan ah in lajoojiyo, laga saaro ama haddii kale la edbiyo ardayda qabta naafooyin si looga hortago dhaqanka dhibaatada leh ama aan munaasabka ahayn. Ardayda qabta naafooyinka waxay leeyihiin qaab hawleed ilaalin gooni ah markasta oo maamulada dugsiga ay doonaan in ay kurogaan edbin ayaga ama edbiyaan. Hawlaha laraacayo waxay waafaqsanyihiin ilaalinta hab socodka looga baahanyahay qaanuunada ladabakhi karo iyo xeerarka.

***DHAQAMADA DHIBAATADA LEH OONA MUNAASABKA AHAYN IYO HEERARKA JAWAAB CELINTA***

**(Si aad u aragtid liiska oo buuxa fiiri boggaga 16 illaa 23)**

| | *Heerka 1* | *Heerka 2* | *Heerka 3* | *Heerka 4* | *Waxaa dhici Karta in Loowareejiyo dhinaca Booliska* |
|---|---|---|---|---|---|
| **Weerar Ardayga ah** (yacnii. dhufasho, laadid ama feerid uu kusameeyo arday kale ayada oo aan u digin gardaro ah) | | | | | |
| Aan jirin dhaawac (aan jirin dhaawacyo la arki karo,jirka ah ...) | | • | | | |
| Dhaawac jirka ah kahor-k illaa heerka 4 | | • | • | • | |
| Dhaawac jirka ah ee heerarka 5 illaa 12 | | | • | • | • |
| **Xoog kumaquunis, Ay kujirto Foor-jeyn iyo Dhacdoyin Laxiriira ardaalnimo ama burcadnimo** | | | | | |
| Dhaqan ula kac ah (uu kujiro hadal, jir ama qoraal) ama xiriir elaktaroonig ah midkaas oo halis gelinaya ama si halis ah u argagax gelinaya si hoosaadna dhibaato ugu gaysanaya nidaamka hawsha dugsiga | • | • | | | |
| Xoog kumaquunis halis ah (kafiiri tusaalooyinka gudaha *Heerarka*) | | • | • | • | • |
| **Dhibaateyn Fasalka ah** | | | | | |
| Kuhadlida fasalka dhexdiisa ama kuhadalida dibadiisa; tuurida waxyaabaha fasalka; soo qaadashada, dhibida ama foorjeynta ardayda kale; iyo dhaqamo kale kuwaas oo kajeediya ardayga waxbarashada | • | • | | | |
| **Diidmo cad oo amarka ah iyo/ama Diidista u hoggaansamida amarada** (aan-rabsho lahayn/aan jir ahayn) | | | | | |
| Lagu guuldareysto raacida tilmaamaha | • | • | | | |
| Lagu guuldareysto in loo jawaabo su'aalaha shaqaalaha dugsiga ama codsashooyinkooda | • | • | | | |
| Lagu guuldareysto raacida tilmaamaha, horseedaysa halis qarsoon ama dhibaato nafta kudhacda ama qofkale | • | • | • | | |
| Lagu guuldareysto in laraaco tilmaamaha midaas oo sitoos ah u horseedaysa dhibaato nafta ama qofkale | • | • | • | | |
| **Dhaqan Ixtiraam la'aan ah** | | | | | |
| Sameynta baaqyo aan munaasab ahayn, calaamado ama faalooyin, ama isticmaalida wax nijaas ah ama luuqad cay | • | • | | | |
| Isticmaalida aflagaado ama hoos-dhigid, ama kubeen sheegid, marin habaabin ama bixinta macluumaad been ah oo lasiiyo shaqaalaha dugsiga | • | • | • | | |
| Isticmaalida aflagaado ama hoos-dhigid, ama kubeen sheegid, marin habaabin ama bixinta macluumaad been ah lasiiyo shaqaalaha dugsiga middaas oo horseedaysa dhibaato dareen ama jirba ah oo lagu sameeyo qofkale | •... | | • | • | • |
| **Daroogo ama Maado Laxakameeyay** (dugsiga adhexdiisa, hawlaha lamaalgeliyay ee dugsiga ama marka ay kulug leedahay dhacdooyin saameynaya ammaanka iyo nolol wanaaga bulshada dugsiga) | | | | | |
| Saameyn hoosteeda ah | | • | • | • | • |
| Isticmaalaya ama lahaansho | | | • | • | • |
| Qaybineya ama iibinaya | | | | • | • |



***XUQUUQAHA ARDAYGA IYO MASUULIYADAHA*** (bogga 25)

**Ardaydu waxay xaq u leeyihiin**

* * in ay kaqayb galaan dugsiga kuyaala degmada midaas oo mid kamid ah waalidka sharciyeysan ama weliga sharciga ah uu deganyahay uuna kuqaato waxbarasho dadweyne lacag la'aan ah oo munaasab ah laga bilaabo da'da 5 illaa 21, sida qaanuunka lagu sheegay

* in uu fisho in dugsiga uu ahaanayo meel ammaan ah, meel nidaam iyo ujeeddo ahaanba loogu talogalay dhammaan ardayda si ay hellaan waxbarasho looguna dhaqmo si sharaf leh, cadaalad ah ixtiraamna u leh ardayda kale iyo shaqaalaha dugsiga

* si ay u galaan dadka ama wakaaladaha awooda bixinta caawimaad tooska ah oo lasiiyo ardayda qabta mushkilado shaksiyeed halis ah

* in laga ilaaliyo argagax, dhibaato u geysasho,ama midab takoor kusaleysan jingsiga dhabta ama midka la arko, midabka, culeyska, asalka dhallashada, kooxda qowmiyada, diinta, ama sameynta diinta, galmo, nooc/aqoonsi nooc, jiheyn galmo, ama naafo, ka haata shaqaalaha ama ardayda joogta hantida dugsiga ama dhacdada dugsiga lamaalgeliyay, waxqabadka ama hawsha

**Ardaydu waxay leeyihiin masuuliyad**

* in ay kaqayb galaan dugsiga maalin walba, si joogta ah iyo wakhtiga loogu talogalay, gutaan hawlaha loo xilsaarey, u dadaalaan si ay u sameeyaan shaqada ugu tayada sareysa ee ugu suurtogalka ah, diyaar u noqdaan in ay wax bartaan

* u shaqeeyaan awoodooda ugu fiican dhammaan hawlaha waxbarashada iyo waxa dheeriga ka ah manhajka, sidoo kale in ay ahaadaan kuwo daacad ah oona caawiya dadka kale

* in ay muujiyaan fikradaha iyo ra'iyaasha qaab ixtiraam leh si aynaan u noqon kuwo xag gudub ah, aflagaado ah, ama u mamnuucin xaqa dadka ay leeyihiin

* in ay dhexdooda is ixtiraamaan isula dhaqmaan si cadaalad ah sida waafaqsan *Xeerarka Degmada loogu talogalay Ladhaqanka Bulshada-balaarkeeda iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka 2013-2014* iyo shuruudaha Qaanuunka Sharafta. Si ay nafsadooda ugula dhaqmaan qaab horumarinaya degaanka midkaas oo kamaran argagax, dhibaateyn, ama midab takoor. Si loo sheego loona dhiirageliyo dadka kale, in ay soo sheegaan dhacdo kasta oo kusaabsan argagixin, dhibaateyn ama midab takoor

***XEERARKA LOOGU TALOGALAY AALADAHA ELAKTAROONIGA LAQAADI KARO*** (bogga 31)

* Marka lagalo Dugsiga **dhammaan teleefoonada gacanta** waxaa khasabtahay in ladhigo khaanada ardayga. Teleefoonka gacanta waa in laga dhigaa mid "DANSAN" ama ah qaab aanan kushaqaynayn.

* Ardaydu **waa in aynaan kuxambaarin wax kusaabsan ama teleefoon gacan shaqaynaya** dhismooyinka dugsiga iyo basaska dugsiga.

* Arday kasta oo **kuqaata** teleefoon gacan **shaqaynaya** dhismaha dugsiga wuxuu lakulmi doonaa in lagala wareego qalabka ayna kala wareegaan Maamulka Dugsiga Degmada ama Shaqaalaha Ammaanka/Badbaadada.

* Marka teleefoon gacan lagala wareego ardayga, shaqaalaha wuxuu isla markiiba kuwar gelinayaa waalidiinta/weliga ardaygaudent, si nidaamyo kale (qaabab xiriir) loola sameeyo ilmahooda. Shuruudaha lawareegida kujira *Xeerarka loogu talogalay Ladhaqanka Bulshada-balaarkeeda iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka shaqaalaha loo hor maleynayo ayaa si dhakhso ah* ula xiriiraya waalidiinta/weliyaasha.

**Degmada waxa dhici karta in ay ogolaato isticmaal habboon oo lagu isticmaalo teleefoonka gacanta fasalka gudihiisa, marka loo isticmaalayo ujeeddooyin waxbarasho keliya IYO keliya marka ogolaanshaha lasiiyey macalinka fasalka.**

* Go'aanka ah in lakeeno qalab elaktaroonig xiriir ama qalabyo ciyaar waa go'aan uu leeyahay ardaygu iyo/waalidiinta/waliyaasha ardayga. Ardayda, waalidiinta/weliyaasha waa kuwo og in Degmadu aan masuuliyad kaqaadayn burburka, dhaawaca, xadida ama lumida kudhacda qalabyadaas oo kale kuwaas oo ugu dhacda arintaasna dhismaha dugsiga. Marka laqaadanayo go'aanka in lagu keeno qalabyadaas oo kale dugsiga, ardayga iyo waalidiinta/weliyaasha waxay kasoo qaadanayaan khatarta kudhici karta dhaawac hoosaad, burbur, xadid, ama waayid

* Qaadashada, faafinta, gudbinta, ama wadaagista sawir galmo, oo fuxshi aho, fisqinimo, ama hadii kale sawiro aan sharciyeysnayn ama sawirooyin, hanoqoto kalawareejin xog elaktaroonig (aaladaha lagu kala wareejiyo fiilo la'aan) ama haddii kale (guud ahaan loogu magacaabo fariimo kudirid, iimayl kudirid, iwm.), waxay noqon kartaa dambi hoos yimaadka qaanuunka Gobolka iyo/ama Dowlada.

***HAWLAHA LAGU SAARO ARDAYGA*** (bogga 32)
Cayrinta dugsiga laga cayriyo waa ciqaab cad midaas oo lagu rogi karo ardayda kulug leh dhaqan kabaxsan-xerada waxbarashada (ma ahan dugsiga gudihiisa ama marka aan ahayn hoosta ilaalada maamulka dugsiga ama shaqaale kasta ama xubin gudi oo kamid ah Degmada), midaas oo sixun u saameynaysa hawsha waxbarasho ama khatar gelisa caafimaadka, ammaanka ama akhlaaqda ardayda, ama keenta halis dhib ah oo kudhaca asaga naftiisa ama ayada nafteeda, ama hantida dugsiga. Ardayda lagu hello in ay kuxad gudbeen Xeerarka Degmada loogu talogalay Dhaqanka Bulshada-balaaran iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka waxay u hoggaan sami karaan ciqaabta soo socota, ha ahaato keliya ama isku jir. Shaqaalaha dugsiga lagu aqoonsaday ciqaab kasta waxaa loo ogolaaday in ay kudul rogaan ama fuliyaan ciqaabtaas, sida waafaqsan xuquuqaha ardayga u sabab ah hawsha.

## *Hawsha Lagu saarayo Ardayga*

(bogga 50 iyo Lifaaqa A, B, C, D, E)

| | Wargelinta Waalidka | Kuwargelinta Waalidka qaab qoraal ah | Kulan Aan rasmi ahayn | Codsi loo diro Xafiiska Kormeeraha | Qaanuunka Waxbarasho ee NYS §3214 Dhagaysi | Codsi loo diro Guddiga Waxbarashada |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **Xabisin** | X | X | | | | |
| **Kajoojinta Gaadiidka** | X | X | X | | | |
| **Kajoojinta Kaqayb galka Ciyaaraha** | X | X | X | | | |
| **Joojinta Gudaha-dugsiga** | X | X | X | | | |
| **Kasaarida Macalinka** | X | X | X | | | |
| **Joojinta Muddada-Gaaban** | X | X | X | | | X |
| **Joojinta Muddada-Dheer** | X | X | X | X | X | X |
| **Joojinta Daa'imka ah** | X | X | X | X | X | X |

***BAARIDA USHA QABATA-BIRTA NASIIBKA AH*** (bogga 44)
Baaritaanada bir-qabatada waa qaabab muhiim u ah qabashada iyo kabaiinta haysashada hub iyo kahortaga cawaaqibteeda. Kormeeraha ama wakiilka ama shaqaale kale oo dugsiga ah ayaa ogolaan kara baaritaanada bir-qabatada ee kusaabsan maalmaha sida aan kutalogalka ahayn loo soo doortey inta lagu guda jiro muddo xaddidan ee maalinta ah, ayada oo ay isticmaalayaan shaqaale u tababaran. Kormeerha ama wakiilka shaqaalayaal kale rasmi oo dugsiga ah ayaa sidoo kale ogolaan kara baaritaanada bir-qabatada kusaabsan maalmaha ladoortey si looga hortago welwelo gaar ah "intiiba loo baahdo" ama maalmo midaas oo dhacdooyin gaar ahi ay dhacayaan.

***BAARIDA USHA QABATA-BIRTA NASIIBKA AH*** (bogga 44)
Baaritaanada bir-qabatada waa qaabab muhiim u ah qabashada iyo kabaiinta haysashada hub iyo kahortaga cawaaqibteeda. Kormeeraha ama wakiilka ama shaqaale kale oo dugsiga ah ayaa ogolaan kara baaritaanada bir-qabatada ee kusaabsan maalmaha sida aan kutalogalka ahayn loo soo doortey inta lagu guda jiro muddo xaddidan ee maalinta ah, ayada oo ay isticmaalayaan shaqaale u tababaran. Kormeerha ama wakiilka shaqaalayaal kale rasmi oo dugsiga ah ayaa sidoo kale ogolaan kara baaritaanada bir-qabatada kusaabsan maalmaha ladoortey si looga hortago welwelo gaar ah "intiiba loo baahdo" ama maalmo midaas oo dhacdooyin gaar ahi ay dhacayaan.



***XUQUUQAHA WAALIDKA/WALIGA IYO MASUULIYADAHA*** (bogga 26)
Xuquuqaha Waalidiinta iyo Masuuliyadaha waxaa laga heli karaa *Xeerarka loogu talogalay Ladhaqanka Bulshada-balaarkeeda iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka 2013-2014.* (Kafiiri MACLUUMAAD DHEERI AH hoos)

***DADKA SOO BOOQDA DUGSIGA*** (bogga 45)
Waalidiinta/Waliyaasha iyo dadka soo booqda dugsiyada waxay u hoggaansamayaan isla qaanuunada sida ardayda oo kale iyo shaqaalaha kale ee dugsiga. Dhammaan dadka soo booqda waa in ay u sheegaan Xafiiska Aasaasiga ah marka ay imaadaan dugsiga, waana in ay sixiixaan, waana in ay xirtaan calaamada aqoonsiga. Qaanuunkaan waxaa dhici karta in uusan lagu khuseynin ama ladabakhin haddii shaqada u furantahay dadweynaha, sida tartan ciyaar oo kale ama kulamo dadweyne. Booqashooyinka labooqdo fasalada inta lagu guda jiro maalinta dugsiga uu jiro waa in hore looga soo habbeystaa macalinka fasalka.

***MACLUUMAAD DHEERI AH***

Nuqul buuxa oo dhameystiran oo kusaabsan Dugsiyada Dadweynaha Buffalo ee ah *Xeerarka loogu talogalay Ladhaqanka Bulshada-balaarkeeda iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka 2013-2014* ayaa lagu ilaaliyay xafiiska dhismo dugsi kasta waxaana laga helayaa bogga intarnatka Degmada ee meeshaan ah: **www.buffaloschools.org**

***SU'AALOOYIN***

Su'aalooyin kusaabsan Xeerarka loogu talogalay Ladhaqanka Bulshada-balaarkeeda iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka *2013-2014* waxaa khasab ah in lagu toosiyo Maamulaha Dhismaha ama Xafiiska Adeegaha Taageerada Ardayga lambarkaan **816-3547**.

***TUSIYAHA ADEEGAHA TAAGEERADA***

Wixii kusaabsan Tusiyaha Xafiisyada kuyaala Guddiga Waxbarashada Buffalo fiiri bogga ( i ) kamid ah *Xeerarka loogu talogalay Ladhaqanka Bulshada-balaarkeeda iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka 2013-2014* ama gudaha bogga intarnatka Degmada.

***Ilaha Banii'aadanimo – Ogaysiis kusaabsan Midab takoor-La'aan***

Dugsiga Dadweynaha Demada Buffalo ma ahan mid dad kumidab takoora wax kusalaysan dadka jinsiyadooda dhabta ah ama la arko, midab, caqiido, diin, sameyn diin, asal dhallasho, koox qowmiyad, galmo (ay kujirto dhibaateyn galmo iyo kuxad gudub galmo), aqoonsi nooc, jiheyn galmo( ereyga "jiheyn galmo" macnihiisu waxay tahay galmo lala sameeyo nooca kale, khaniisnimo, labada noocbau galmooda, ama waayida rabida galmada), u sheegasho siyaasad, da'a xaalada guur, xaalada ciidan, xaalad askari hore, naafo, culeys, xaalada dhibane guri, xirid ama diiwaan xukun, macluumaad hiddo ama wax kale oo kamamnuucan Gobolka New York iyo/ama qaanuunada dowlada midab takoor-la'aanta ee kujira barnaamijtiisa iyo hawlaha oona bixinaya gelitaan siman oo lagalo ururka dhalinyarada Boy Scouts iyo kooxo dhallinyaro kale oo cayiman ama qoondeysan . Su'aalooyinka khuseeya siyaasadaha Degmada midab takoor-la'aanta waxaa khasab ah in lagu soo toosiyo dhinaca:
HRCompliance@buffaloschools.org

Brian T. Lorentz, Ku Xigeenka Agaasimaha Ilaha Banii'aadanimo
719 City Hall
Buffalo, New York 14202
(716) 816-3579

**Xeerarka Dugsiyada Dadweynaha** ***Buffalo ee loogu talogalay Ladhaqanka Bulshada-balaarkeeda iyo Taageerooyinka Soo dhexgalka 2013-2014 waa mid lagu dabakhi karo dhammaan dadka oo dhan ee jooga dhismaha dugsiga ama kaqayb galaya shaqo dugsi aan ka ahayn halka shuruud gaar ah ee kusaabsan Xeerarka ay sheegayso in lagu dabakhi karo keliya koox dad gooni ah. Khulaasadaan waxay diirada saareysaa qaanuunada lagu dabakhi karo ardayda iyo waalidiinta.Qaanuunada ku xusan Xeerarka ma ahan keliya xeerar xukumaya ladhaqanka iyo waxqabadka ardayda Degmada, shaqaalaha iyo dadka booqashada kuyimaada; looguma talogalin in, mana ahaan doonto mid loogu talo gali doono, lagu xadeeyo awooda Degmada si loo qaado ficil jawaab munaasab ah kusaabsan aasaasada aan lagu qorin gudaha Xeerarka, ay kujirto dhaqanka dhismaha dugsiga xaalado munaasab ah.***